

## “Diyaaradaha Itoobiya oo xasuuqay shacab Soomaaliyeed”

**16 Ramadan 1446 H (16 Maarso 2025)** – Kadib guuldarradii kasoo gaartay furimaha dagaalka ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, waxay dowladda ridada - iyadoo kaashaneysa xulafadeeda saliibiyiinta ah- geysatay duqeymo fuleynimo ah oo ay ku beegsadeen dadka shacabka ah ee ku nool wilaayaatka Islaamiga ah.

Diyaarado ay leeyihiin saliibiyiinta Itoobiya oo fulinaya codsi uga yimid madaxweynaha dowlada ridada, Xassan Gurguurte, ayaa saacadihii la soo dhaafay duqeymo wuxuuushnimo ah ka geystay wilaayaatka Islaamiga ee Shabeellada dhexe, Shabeellada hoose iyo Jubada Dhexe, iyadoo dilay shacab iskugu jira dumar, caruur iyo waayeel, hanti fara badana burburiyey.

Wilaayada Shabeellada dhexe, waxay diyaaradaha xabashida Itoobiya xilligii afurka kadib beegsadeen magaalada Ceel-Bacad, waxayna fuustooyin ay ka buuxaan waxyaalo qarxa iyo shidaal ku beegsadeen guryo ay ku nool yihiin dad shacab ah. Waxaa duqeymahaas lagu dilay Hooyo iyo laba caruur ah oo ay dhashay, waxayna kala yihiin:

- 1) Hooyo Aamino Aw Maxamuud Xasan Calasow
- 2) Hibo Barre Maxamuud (4 jir)
- 3) Haboon Barre Maxamuud (5 jir)

Degmada Jilib ee Jubada dhexe, waxay diyaaradaha cadawgu xilli saqdii dhexe ah beegsadeen Suuqa Khudaarta ee Al-Aqsa, dhismaha Jaamacadda Al-Qimmah iyo guryo ay shacabku degan yihiin. Marka laga yimaado khasaaraha hantiyeed, waxaa duqeyntaas ku dhaawacmay hooyo iyo laba caruur ah oo ay dhashay, kuwaas oo kala ah:

- 1) Hooyo Maryan Cabdullaahi
- 2) Seynab C/Risaaq Xasan 5 Jir
- 3) Bushra C/Risaaq Xasan 8 jir

Dhanka wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada hoose, diyaaradaha Itoobiyaanka ayaa duqeeyay degmada Awdheegle oo ay shalay Mujaahidiintu kala wareegeen maleeshiyaatka dowlada ridada. Duqeyntan waxay cadawgu la beegsadeen guri ay dad shacab ah deganaayeen waxayna ku dileen:

- 1) Ayeeyo Xaajiyo Faadumo Axmad Macallin Cumarow (62 jir)
- 2) Awoowe Nuur Macallin Cumarow ( 60 jir)
- 3) Mukhtaar Maxamad Axmad ( 17 jir)

Sidoo kale diyaaradaha saliibiyiinta Itoobiya ee fulinaya codsiga Xasan Gurguurte ayaa 2 qof oo shacab beeraleey ah ku dilay duqeyn ay ka geysteen beeraha degaanka Daarusaalam ee hoostaga degmada Awdheegle, waxayna kala yihiin:

- 1) Maxamad Cali Abow (22 jir)
- 2) C/Casiis Maxamad Cabdulle Axmad (12 jir)

Duqeymahan ay gaysanayaan saliibiyiinta Itoobiya, laguna beegsanayo shacabka Soomaaliyeed , ayaa kusoo aadaysa xilli ay murtadiinta dabadhilifka u ah saliibiyiintu ku soo jabeen furimaha dagaalka, Mujaahidiintuna xoreeyeen degmooyin iyo deegaano badan oo dib loogu soo celiyay xukunka shareecada Islaamka. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u tacsiiyaynaysaa dhamaan dadkii shacabka ahaa ee ku shahiiday duqaymaha saliibiyiinta Itoobiya, waxayna Allaah uga baryaysaa inuu Janadiisa ku abaal mariyo, ehelkoodana sabar ku irsaaqo. Inta dhaawacan waxaan u rajaynaynaa inuu Allaah caafimaad siiyo, intii ku hanti beeshayna uu Allaah baddal khayr qaba siiyo

Dadka Soomaaliyeed waxaa marba marka ka sii dambeysa usii cadaanaysa cadaawadda iyo nacaybka ay Xassan Gurguurte iyo maamulkiisu u qabaan guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, isagoo horey u xaraashay khayraadkii dalka, boobay hantidii guud iyo middii gaarka ahayd ee shacabka, haddana u adeegsanayaan diyaaradaha saliibiyiinta Itoobiya oo ah cadawga soo jireenka ah ee umadda Soomaaliyeed si ay u xasuuqaan shacabka, una burburiyaan hantidooda. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ugu baaqaysaa dhamaan dadka Soomaaliyeed ee Muslimiinta ah inay hubka u qaataan sidii la iskaga difaaci lahaa isbahaysiga gaalada ee iskugu jirta saliibiyiinta iyo murtadiinta, gaar ahaan dhalinyarada waxaa saaran waajib ah inay difaacaan diintooda, dalkooda iyo dadkooda.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysaa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhammaan dhulalka Muslimiinta ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaadeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah illaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ



وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ